

# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GUDDIGA CADAALADDA



**Xeernidaamiyaha Anshaxa iyo Anshax marinta Garsooreyaasha iyo XeerIlaaliyeyaasha Jamhuuriyadda Soomaaliland**

# JAMHUURIYADA SOMALILAND
# GUDDIGA CADAALADDA

## Xeernidaamiyaha Anshaxa iyo Anshax marinta Garsooreyaasha iyo Xeer Ilaaliyeyaasha Jamhuuriyadda Soomaaliland

MS/GGC/G-3/ 29/2012 05/08/2012

**UJEEDDO: Go'aan ku saabsan Ansixin Xeer Nidaamiyaha Anshaxa iyi Anshax marinta Garsooryaasha iyo Ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud JSL**

Guddiga Cadaaladdu:

Wuxuu fadhigiisii 8aad ee qabsoomay manta oo bishu tahay 04/08/2012, si waafaqsan Qod. 107(3) iyo Qod. 108 ee dastoorka JSL.

Ka dib markii uu Qodobaka Ajendaha si qoto dheer uga dooday, sida uu qeexayo qoraalkiisa (Minutes Book).

MARKAY ARKEEN: Danta Guud ee Cadaalada

MARKAY ARKEEN: Qod. 107(3) ee Dastuurka JSL.

MARKAY: Dood Dheer iyo Falanqayn ku sameeyeen Xeer Nidaamiyaha Anshaxa iyo Anshax marinta Garsoorayaasha iyo Ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud JSL, oo ka dhashay kulan Hawleedkii ay ku yeesheen bahda GarsoorkuDiyaarintii Xeerkan oo ku qabsoomay Jaamacadda Hargeysa 16 ilaa 20kii Juune, 2012,

SIDAAS DARTEED

WUXU GO'AAMIYEY:

In la ansixiyay Xeer Nidaamiyaha Anshaxa iyi Anshax marinta Garsooryaasha iyo Ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud JSL.

**Allaa Mahad Leh.**

**Yuusuf Ismaaciil Cali**

**GUDDOOMIYAHA GUDDIGA CADAALADDA**

# ARRAAR

**Maadaama** oo Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliland oo dhisay nidaam garsoor madaxbanaan oo u xil saaran ilaalinta xuquuqaha iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee uu dastuurku siinayo muwaadiniinta Soomaaliland, iyo fidinta garsoor caddaalad ku salaysan;

**Maadaama** oo ay mudan tahay in la xaqiijiyo in nidaamka garsoorka iyo maxkamaddaha dalku yahay mid ay kalsooni buuxda ku qabaan dadweynaha ay u fidinayaan adeegga garsoorku;

**Maadaama** oo si loo xaqiijiyo jiritaanka garsoor kalsooni ka haysta dadweynaha, ay lagama maarmaan tahay in la helo nidaam cad oo xaqiijin kara;

- In garsooreyaashu iyo xeer ilaaliyeyaashu u madax banaanaadaan gudashada hawlahooda; iyo
- In garsoreyaasha iyo xeer ilaaliyeyaasha lagala xisaabtamo qaladaadka ay ku galaan gudashada waajibaadyadooda shaqo.

**Kadib markii ay u caddaatay** Guddiga Caddaaladda in aanuu jirin nidaam dhamaystiran oo haga madaxbanaanida iyo la xisaaabtanka garsooreyaasha;

**Kadib markii ay Guddiga caddaaladdu garawsatey** in ay lagama maarmaan tahay in si faahfaahsan loo bayaamiyo Nidaamka Anshax marinta Garosoorka ee uu dhigayo Xeerka Niddamka Garsoorka Soomaaliland (Xeer lamb 24/2003), si ay Guddiga u suurto gasho in ay gudato waajibaadkeeda dastuuriga ah ee ku cad Qodobka 106aad ee Dastuurka Soomaaliland;

**Sidaasi darteed**, Guddiga Caddaaladda Soomaaliland, iyadoo ka duulaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah ee Qod.108aad ee Dastuurka iyo Qod 32aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliland, Xeer lamb. 24/2003, waxa uu soo saarey Xeer-nidaamiyahani oo lagu maamuli doono hab-raaca anshaxa iyo mas'uuliyadaha garsoorenimo ee garsooreyaasha maxkamaddaha Soomaaliland.

## QAYBTA KOOWAAD
## QODOBO GUUD

### QODOBKA 1AAD: CIWAAN GAABAN

Xeer nidaamiyahan waxa lagu magacaabaa "Xeer nidaamiyaha Anshaxa iyo Anshax marinta Garsooreyaasha iyo Xeer Ilaaliyeyaasha Jamhuuriyadda Soomaaliland".

### QODOBKA 2AAD: XADKA DABAQISTA XEER-NIDAAMIYAHA

1. Xeer-nidaamiyahani waxa uu qeexayaa anshaxa suuban iyo masuuliyaddaha xirfedlenimo ee garsooreyaasha iyo xeer ilaaliyeyaasha, iyo waliba talaabooyinka

anshax iyo nidaamka loo marayo anshax-marinta garsooreyaasha iyo xeer-ilaaliyeyaasha ku xad-gudba anshaxa suuban iyo masuuliyaddaha xirfadlenimo.

2. Xeer nidaamiyahan waxa lagu dabaqayaa garsooreyaasha Maxkamadaha Hoose iyo xeer ilaaiyeyaasha Jamhuuriyadda Soomaaliland.

3. Iyadoo ay sidooda ahaanayaan anshaxa suuban iyo masuuliyaddaha garsoorenimoiyo xeer ilaaliyenimo ee lagu qeexay xeer-nidaamiyahan, ayaa haddana dhaqan kasta oo ka yimaada ama uu ku kaco garsoore ama xeer ilaaliye oon lagu xusin xeernidaamiyahan oo saamayn taban ku yeelanaya sharafta, madaxbanaanida, karaamada iyo dhex dhexaadnimada garsooreyaasha iyo xeer ilaalinta waxa loo qaadanayaa fal xad gudub ku ah anshaxa suuban ee garsoorka, cidda ay khusaysana waxa laga qaadaya talaabo anshax oo waafaqsan xeer nidaamiyahan.

**4.** Xeer nidaamiyahan waxa kale oo lagu dabaqayaa intii ay ka khusayso hawlwadeenada maxkamadaha hoose iyo xeer ilaalinta iyadoo anshaxmarintoodana loo raaci doono si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Dawladda

**QODOBKA 3AAD: QEEXID**

Haddii aanu tuduca ay ku jiraan micno kale siininin,

**Maxkamaddaha hoose:** waxa loola jeedaa maxkamadaha Racfaanada, Gobolada iyo Degmooyinka

**Hawl-wadeenada**: waxa loola jeedaa kaaliyaha sare, kaaliyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee maxkamadaha hoose iyo xeer ilaalinta ee hawshooda shaqo ay si toosa ama si dadban ula xidhiidho arrimo khuseeya dacwaddaha maxkamaddahaasi soo gala.

**Kormeerka iyo dabo galka:** waxa loola jeedaa xubno ay magacawdo Guddiga Caddaladda jamhuuriyadda Soomaaliland oo shaqadoodu tahay kormeerka iyo dabo galka hab sami u socodka hawlaha garsoorka, iyo baadhista iyo hubinta dacwdaha la xidhiidha la xidhiidha anshaxa gasoorka

**Xeer ilaaliye:**waxa loola jeedaa ku xigeenada xeer ilaaliyaha guud, wakiilada xeer ilaalinta iyo xubnaha booliiska ee qabta hawlaha xeer ilaalinta

**QODOBKA 4AAD: FASIRAADDA XEER NIDAAMIYAHA (INTERPRETATION)**

1. Xeer Nidaamiyah waxa loo fasirayaa si waafaqsan Dastuurka Soomaaliland , diinta Islaamka iyo mabaadiida garsoorka ee caalamku is la waafaqsan yahay.

2. Guddiga Caddaaladda ayaa leh hawsha iyo xilka fasiridda xeer nidaamiyahan

## QAYBTA LABAAD
## MIN QIYAASKA ANSHAXA IYO MAS'UULIYADDA XIRFADLENIMO
## WAAXDA KOOWAAD

## MIN QIYAASKA ANSHAXA IYO MASUULIYADDA XIRFADLENIMO EE GARSOOREHA

**QODOBKA 5AAD.: MABAA' DIIDA GUUD**

1. Garsoor Madax-banaan oo dhawrsooni waxa uu lagama maarmaan u yahay xaqiijinta Caddaaladda ay ummadda Soomaaliland u baahan tahay. Si loo illaaliyo madax-bannaanida iyo sharafta garsoorkana, garsooruhu waa in uu la yimaaddo, oo uu kusifaysnaado markastana ilaaliyo akhlaaqda suuban iyo hab dhaqan xirfadlenimo oo heerkeedu sareeyo.
Mabda'a aasaasiga ahi isaga oo uu sidiisa yahay lana dhawraayo, ayaa haddana waxa garsooraha looga baahan yahay in uu ku sifoobo oo uu kudhaqmo maba'adiidan gaar ka ah ee hoos ku qoran:

b. Garsooraha dhaqankiisu waa inuu markasta noqdo mid kor u qaadaya kalsoonida ay dadweynuhu ka qabaan sharafta, dhawrsanaanta iyo madax-banaanida garsoorka;
t. Garsoorahu waa in uu noqdo mid leh xirfad heerkeedu sareeyo iyo dhaqan suuban; oo uu isla markaana dhawra kuna dhaqma sharciga, unaguta waajibaadkiisa shaqo si ay ku dheehantahay dhex-dhexaadnimo iyo xilkasnimo.
j. Garsooruhu waa in ka dhawrsoonaado hab dhaqan iyo xaalad kasta oo dhalin karta in wax la iska waydiiyo amaba shaki galin karta dhawrsanaantiisa, dhex-dhexaadnimadiisa ama madaxbannaanidiisa

2. Maba'adiida kor ku xusani ma khuseeyaan xiliga shaqo ee garsooraha oo kaliya, balse waxa sidoo kale lagu dabaqaayaa qaar kamid ah hab-dhaqanka garsooraha ee dhinacyadda arrimaha gaar ahaaneed, bulsheed iyo siyaasaddeed ee saamayn ku yeelan kara kalsoonida dadweynaha ee ku wajahan garsooraha, dhaawacina karta madax-banaanida iyo dhex-dhexaadnimada guud ee garsoorka.

**QODOBKA 6AAD: QODOBO XEERINAYA ANSHAX IYO MASUULIYADAHA XIRFADEED EE GARSOOREYAASHA**

***6.1. <u>MAS 'ULIYADDAHA GARSOORISTA</u>***

1. Garsooraha waxa waajib ku ah in uu ilaaliyo xuquuqaha iyo xoriyaadka dhammaanba dhinacyada uu u garsoorayo, oo uu u si dhakhso ah oo caddaalad ahna u dhamaystiro/go'aamiyo dacwaddaha

2. Garsoorahu, marka uu gudanaayo waajibaadkiisa garsoor, waxa ku waajib ah in uu xaqiijiyo in uu si haboon u dabaqo sharciga Dalka iyo nidaamyada caalamka laga aqoonsaday, iyo in dhagaysiga dacwaddahu noqdo mid ku sifaysan caddaalad oo ka dhawrsoon wax faquuq ah oo ku salaysan sinji(gender), isir, midab, luuqad, diin, siyaasad, fikir, dhalasho, qabiil, amaba sabab kale.

3. Si gaar ahna, garsooraha waxa saaran masuuliyadahan soo socda:

b. in uu dhammaanba dacwadaha ku qaabilo si ay ku dheehan tahay madax-

banaani iyo dhex-dhexaadnimo oo ka dhawrsoon arrimo kale oo saamayn ku yeelan karta; waana in uu xaqiijiyo in uu gudashada waajibkiisa garsoorenimo uu ku tiirsanyahay xogaha iyo xeerka khuseeya dacwaddaha horyimaadda oo aanay dhicin in go'aamadiisu noqdaan qaar ay saameyn kuyeeshaan cabsi, caddaadis, laaluush ama faro-galin toosa ama dadban meesha ay doonto ha ka timaado'e;

t. in uu dhageysto go'aanna ka gaaro dacwooyinka loo xilsaaro, marka laga reebo dacwaddaha uu sharcigu ka reebo dhageysigooda

j. in uu uhogaansanaado sharciga, leeyahayna xirfadda iyo aqoonta garsoorenimo ee looga baahan yahay.. Waana in aysan garsooraha majaro-habaabin danaha dhinacyadda, aragtida daweynaha ama cabsi uu ka qabo in la dhaliilo.

x. in uu xaqiijiyo in la dhawro xasiloonida iyo habsami u socodka dhagaysiga dacwadda uu dhageysanayo;

kh. in uu noqdo mid dulqaad badan, sharaftiisana dhawra, oo tixgaliya dhinacyadda dacwaddu ka dhaxayso, markhaatiyada, qareennada iyo dadka kale ee ay isaga wada shaqayntu ka dhaxayso; waana in uu xaqiijiyo in sidaasi si la mid ah ay u dhaqmaan qareennada, saraakiisha iyo shaqaaleha kale ee maxkamadda ee uu mas'uulka ka yahay;

d. in uu xilka garsoorka u gutaa eex la'aan; inta la sugayo ama ay laalan tahay dacwadduna, waxa ka reeban garsooreha in uu ka bixiyo faalo caam ah oo raad ku yeelan karta go'aanka laga gaari doono dacwadda ama wax u dhimaysa xaq-soorka, ama in uu ka bixiyo faallo gaar ah oo keeni karta xad-gudub laga galo xaq-soorka ama dhagaysiga dacwadda. Sidoo kalena garsooruhu waa in uu xaqiijiyo in hawl-wadeenada maxkammaddu aanay bixin wax war amaba faalo ah oo kusaabsan dacwaddaha maxkamadda horyaalla;

r. Marka uu xilka garsoor gudanayo, waa inuusan ku kicin ereyo ama fal laga dheehan karo eex ama liidid, sidoo kalena waa in aanu u ogolaan shaqaalaha, saraakiisha maxkamadda iyo cidda kale ee mus'uuliyaddiisa hoos yimaada inay falalkaas oo kale sameeyaan.

s. in uu qof kasta oo dan sharciyeed ku leh dacwadda ama qareenkiisa siiyo fursad uu dacwaddiisa ku soo gudbisto si waafaqsan sharciga.

Sh. Waa in uu yeesho khibrad sharciyeed iyo aqoon xirfadeed oo heerkeedu sareeyo,waana in si uu taasi u gaadho ka qayb-galo fursadaha aqoon korodhsi ama tabobar ee la heli karo;

dh. waa in uu ka fogaado xaalad kasta oo dhalinkarta is-khilaaf danneed (conflict interest) oo ku salaysan xidhiidh qoys ama bulsheed ama dano dhaqaale ama xidhiidh xirfadeed

c. waa in uu ka baxo ama ka joogsado dhagaysiga dacwad uu ogaaday in ay tahay mid dhalinaysa is-khilaaf daneed.

### *6.2. <u>MASUULIYADDAHA KA BAXSAN HAWSHA GARSOORKA</u>*

1. Guud ahaan garsooruhu waxa u xor u yahay in uu galo amaba qabto hawlo ka baxsan hawlaha garsoor sida hawlo ay tahay in uu qabsado isagoo ka faa'iideysanaya xaquuqdiisa muwaadinka ama kuwo ka turjumaya danahiisa iyo madax-bannaanida xirfaddisa. Iyadoo ay sidaasi tahay xoriyadda guud ee uu xeeriyey qodobkani, garsooruhu waxa uu awoodi karaa, xaqna u leeyahay in uu galo ma ka qayb galo hawlahan soosocda:

b. in uu ka hadlo, wax ka qoro, baro oo uu ka qayb-qaato arrimaha la xidhiidha

sharciga; nidaamka guud ee sharciga (legal system)iyo nidaamka maamulka Caddaaladda; iyo

t. in uu ka qayb qaato amaka qayb galo arrimaha far-shaxanka/dhaqanka, cayaaraha iyo arimaha kale ee bulshada; sidoo kalena ka qaybgalo hawlaha la xidhiidha gargaarka bulshada haddii aanay arrimahaasi dhaawacaynin dhawrsnaanta garsoorka ama ba aanay saamayn ku yeelananynin gudashada waajibaadkiisa garsoor.

***6.3. ARRIMAHA KA REEBAN GARSOOREHA***

Garsooraha waxa ka reeban:

1. in uu isu sharaxo doorashooyinka qaranka ama goleyaasha deegaanka ama uu qabto boos siyaasaddeed, amaba uu ka qayb qaato dhaqdhaqaaqyo siyaasaddeed oo aan la jaan-qaadi karin hawlahiisa garsoorenimo

2. in uu qayb ka noqdo amaba uu taageero urrur, koox ama hayad taageerta ama hawsheedu tahay in ay dhiiri galiso faquuq;

3. in uu galo hawl ganacsi amaba maaliyaddeed oo dhaawici karta dhex-dhexaadnimadiisa, dhalinkarta faro-galin soo waajahda habsami u socodsiinta fulinta waajibaadyada garsoorka, keeni karta in uu si qaldan ugaga faa'iideysto awooddiisa garsoorenimo ama in uu macaamilaad la galo/la yeesho qareenno amaba shakhsiyaad ay dani ka soo gali karto maxkamadda uu ka shaqeeyo.

4. In uu bixiyo addeeg sharci ama ba uu si shakhsi ah u galo hawl garsoor sida qareen difaac, dhex-dhexaadin ama guurti.

5. In xaaladdii doontaa ba ha jirtee, uu hadiyad, casuumad, axsaan fal amaba balan-qaad kale ka qaato/ aqbalo qof si toosa ama si dadban u danaynaya dacwad uu garsooruhu dhagaystay ama uu gacanta ku hayo; iyo

6. Inuu ka qayb-galo dhageysiga dacwad aanu qayb ka hayn

## *6.4. MAS'UULIYADDAHA MAAMUL EE GARSOOREHA*

1. Garsoorahu waa in uu si taxaddar joogta ah oo aysan ku jirin eex ama xaqiraad u gutaa masuuliyadda maamulka ee garsoorka, waana in uu xaqiijiyaa ikhtisaaska xirfadeed ee maamulka garsoorka, isla markaana uu kaashadaa garsoorayaasha iyo saraakiisha kale ee Maxkamadda si ay u gutaan hawlaha maamulka Caddaaladda.

2. Garsoorahu waa in uu faraa shaqaalaha, saraakiisha Maxkamadda iyo dadka kale ee hoos yimaada awooddiisa maamul ee garsoorenimo in ay u hoggaansamaan xeer nidamiyayaasha hawlaha garsoorka iyo hab dhaqanka suuban ee laga doonayo garsoorka; oo ay xilkooda u gudaan si aanay ku jirin ka reebanaato eex ama xaqiraadi.

3. Garsoorayaasha haya masuuliyad kormeer ee xil-gudashada garsoorayaal kale, waa in uu qaadaa talabooyinka macquulka ah ee ay ku gudanayaan xilkooda ku aadan

arrimaha la horkeeno, iyo weliba in ay u gutaan hawlaha kale ee khuseeya masuuliyaddaha kale ee garsoor.

4. Garsooraha waxaa ka reeban in uu sameeyo magacaabid aan lama huraan ahayn. Sidoo kalena Garsoorahu waa in uu ka dhawrsanaado qaraabeysi iyo qofjecleysi, balse uu magacaabidda ku saleeyo dhexdhexaad iyo mudnaan arinta. Mana aha in uu garsoorahu u ogolaado ama u gooyo dadka uu magacaabay mushqaayad mag-dhaw ka badan addeega ay qabtaan.

5. Garsooruhu, haddii uu ogaado in qareen ama xeer-ilaaliye ku kacay fal lid ku ah dhaqanka suuban ee xirfadlenimo waa in uu talaaabda sharci ee ku haboon ka qaado, ama , waa in uu dhacdadaasi ku wargaliyo hay'adda mas'uulka ka ah qareenka ama xeer ilaaliyeha falkaasi ku kacay.

## WAAXDA LABAAD

## MIN QIYAASKA ANSHAXA IYO MAS'UULIYADDA XIRFADLENIMO EE XEER-ILAALIYEYAASHA

### QODOBKA 7AAD: XILKAS IYO XIRFEDLENIMO

Xeer-Ilaaliyuhu waa :

1. In uu yahay qof xilkas ah oo lagu yaqaan dhaqan suuban, daacadnimo iyo dabeecad wanaag;

2. In uu yahay mid aqoon fiican iyo faham u leh sharciga iyo sida loo dabaqo sharciga, oo si haboon u gudan kara waajibaadkiisa shaqo waana in si uu taasi u gaadho ka qayb-galo fursadaha aqoon korodhsi ama tabobar ee la heli karo.

3. In uu yahay mid ixtiraama, ilaaliya oo sidoo kalena difaaca sharafta iyo xuquuqaha aasaasiga ah ee bani-aadamka ee ku dhigan Dastuurka Soomaaliland iyo xuquuqaha kale ee caalamku aqoonsan yahay ilaalintooda;

4. In uu ilaaliyo danta caamka ah

5. In uu yahay qof lagu yaqaan toosnaan, madax-bannaani iyo dhex-dhexaadnimo;

6. In uu yahay mid hawlahiisa xirfadeed u guta si ay ku dheehan tahay asluub iyo dad ladhaqan haboon iyo si waafaqsan sharciga iyo waliba minqiyaaska iyo hab dhaqanka u yaal xirfadda xeer-ilaaliyenimo,

7. In uu ku daddaalo in uu ogaado oo uulasocdo isbadalada iyo horumarka soo baxa ee khuseeya hawlahiisa iyo xirfadiisa;

8. In uu markasta ilaaliyo sharafta iyo karaamada Xirfadda xeer Ilaalinta, oo uu sidoo kalena xaqiijiyo in labiskiisa iyo hab-dhaqankiisuba yihiin kuwo kor u qaadaya meeqaamkiisa iyo dhawrsoonaanta bilicda Garsoorka.

**QODOBKA 8AAD: MADAX-BANNAANI**

1. Xeer Ilaaliyayashu waa in ay u gutaan xilkooda xeer ilaalineed si ay ku dheehan tahay madax bannaani.

2. Awoodda ikhtiyaariga ee xeer-ilaaliyeyaashu u leeyihiin in ay oogaan ama joojiyaan dacwad ciqaab ahi waa in loo addeegsado si ay u madax-bannaanyihiin oo aysan jirin farogalin siyaasaddeed, dadweyne ama garsoor oo saameyn ku yeelata.

**QODOBKA 9AAD: DHEX-DHEXAADNIMO**

Xeer Ilaaliyeyahu marka uu waajibaadkiisa gudanayo waa in aanuu noqon mid baqa, eexda ama ku talo gala in uu cid waxyeeleeyo; gaar ahaanna waa in;

1. uu hawlahiisa shaqo u gutaan si ay ku dheehan tahay dhex-dhexaadnimo;

2. aanuu galin dacwad ama arrin ku suntan ama ba dhalin karta is khilaaf daneed (conflict of interest)

3. uu yahay mid markasta tixgalin siiya danta caamka ah oo kaliya, oo aanay jirin warbaahin amaba qaybsnaan siyaasaddeed ama dano kale oo wax saameyn ah ku yeesha go'aamadiisa iyo gudashada hawlahiisa.

4. uu ka fogaado oo aanu galin siyaasad ama hawlkale oo wax u dhimaysa ama looarki karo in ay aysan la jaan qaadi karin madax-bannaanidiisa iyo dhex-dhexaadnimadiisa;

5. In xaaladdii doontaa ba ha jirtee, annuu hadiyad, casuumad, laaluush, axsaan fal ama ba balan-qaad kale ka qaadan/ aqbalin qof si toosa ama si dadban u danaynaya dacwad uu xeer ilaayuhu u oogey ama uu gacanta ku hayo.

6. Aanu sheegin ama aanu bixin warbixin kasta oo uu ku helay gudashada xilkiisa shaqo, marka laga reebo xaaladda ay daruuri u tahay gudashada waajibaadkiisa shaqo.

7. waa in uu go'aamadiisa ku saleeyo dhex-dhexaadnimo oo uu tixgalin gaar ah siiyo xuquuqda sinaanta iyo reebannaanta faquuqa ee Dastuuriga ah;

8. Waa in uu go'aankiisa ku saleeyo dhammaan xaaladdaha saameeya dacwadda oo uu xaqiijiyo in intii suurtogalah,inuu dib u qiimeyn ku sameeyo si uu u hubiyo caddaymaha loo soo gudbiyo isagoo aan tixgalinsiinaynin in dib u qiimeyntaasi ay noqon doonto mid u dan ah ama dhan ka ah eedeysanaha

9. Waa in uu fiiro gaar ah u yeesho dannaha dhibeneyaasha dacwaddaha, oo uu si waafaqsan sharciga oo ay ku dheehan tahay sinaan iyo dhexnimo ugu caddalad falo dhibenaha, eeddaysanaha iyo dadweynaha ;

10. Waa in uu maxkamadda ka caawiyo sidii ay u gaadhi lahayd xukun caddaalad ah, iyo in ay maxkamaddu ugu ciqaabi lahayd ciqaab ka turjumaysa caddaymaha la horkeenay maxkamadda ee ka dhanka ah eedeysanaha ay dambi ku hesho.

**QODOBKA 10AAD: DOORKA XEER-ILAALIYUHU KU LEEYAHY MAAMULKA CADDAALADDA**

1. Xeer-Ilaaliyeyaashu waa in ay waajibaadkooda shaqo u gutaan si deg deg ah oo ay kudheehan tahay caddaalinimo iyo toosnaan; si gaar ahna waa in ay:

   1. Waajibkooda shaqo u gutaan si ay ku dheehan tahay kalsooni iyo xilkasnimo oo waafaqsan sharciga iyo hab-dhaqanka wanaagsan ee looga baahan xeer-ilaalinta;
   2. Dhawraan mudooyinka uu cayimo xeerka habka ee nidaamiya hawlaha garsoorka,oo ay markasta noqdaan kuwo dadejiya dacwaddaha oo tixgaliya sida ay dacwadduhu u soo kala horeeyeen iyo sida ay u kala mudan yihiin;
   3. marka ay sharciyan ku waajibto in ay ka qaybqaataan ama caawiyaan dambi baadhis, ugutaan waajibkaasi si ay ku dheehantahay xilkasnimo, dhex-dhexaadnimo iyo karti oo uu markasta xaqiijiyo in hay'addaha dambi baadhistu ilaaliyaan oo xurmeeyaan maba'adiida sharciga ah iyo xuquuqaha bani-aadamka ee aasaasiga ahi;
   4. Iyagoo dhawraya xuquuqaha eedeysanaha iyo dhibaneyaashaba, haddii ay sharciyan u bannaan tahay ay tixgaliyaan dacwasdaha ciqaabta ah ee ay tahay in aan la oogin, ee la hakin karo dhageysigeeda iyadoo lagu xidhayo ama aan lagu xidheynin shuruud, ama ay tahay in laga leexiyo ama aan la geynin maxkamaddaha caadiga (Nidaamka Caddaaladda tooska ah (divert from formal Justice system)
   5. oogaan dacwad ciqaab ah, marka ay hubaan in ay jiraan caddaymo lagu kalsoonaan karo oo sharciyan la aqbali karo; waana in aanay Caddeymahaasi la'aantoodna oogin dacwad;
   6. Inta lagu guda jiro geedi-socodka dhageysiga dacwadda, noqdaan kuwo usoo jeedda oo uga qaybqaata dacwadda si caddaalad iyo xilkasnimo ay ku dheehan tahay.

2. Xeer Ilaaliyeyaashu ;

   1. Waa in ay dhawraan sirta hawsha xeer ilaalinta
   2. Waa in ay Ka fogaadaan in ay warbaahinta ama dadweynaha u jeediyaan xog ama faalo aan ku habooneyn oo ku saabsan dacwad ciqaab ah oo dhageysigeedu socdo ama dacwad ciqaab ah ayna ka dhamaan muddadii racfaanku;
   3. Waa in tixgaliyaan ra'yiga, xuquuqaha iyo danaha kale ee sharciyan ay yeelan karaan dhibenayaasha iyo markhaatiyada marka ay arrintu saameynayso ama saameyn ku yeelan karto danaha shaqsi ee dhibenaha iyo markhaatiga. Waana in ay xaqiijiyaan in la ogaysiiyo wixii xuquuq ah ee ay leeyihiin dhibenayaasha iyo markhaatiyadu, gaar ahaanna suurtogalinaya in uu dhibanuhu magdhaw heli karo iyo xaqa ilaalineed ee markhaatiga.

4. Waa in, haddii aanay danta ummaddu ku jirin ama aysan wax u dhimaynin dan ama xuquuq qofkale sida dhibane, markhaati ama eedeysane, ay u sheegaan sababta ay awoodda xeer-ilaalineed ee ikhtiyaariga ah u adeegsadeen qofkasta oo danaynayn sharci ku leh arrinta oo sidaasi ka codsada;
5. Marka ay ku jiraan arrimo khuseeyadacwad ay carruuri dhibane ama markhaati ka tahay, waa in ay xaqiijiyaan oo ay tix galiyaan sida ugu ay ku jirto danta carruurtu;
6. Waa in ay dhawraan xuquuqaha dadka dambiyo loo haysto oo ay xuquuqahaasi u ilaaliyaan si waafaqsan Xeerarka iyo minqiyaasyada Xuquuqal insaanka ee caalamiga ah ee lagama-maarmaanka u ah in dhagaysiga dacwaddu noqdo mid caddaalad ah;
7. Waa in sida ugu suurto-galsan ee waafaqsan xeerka ama dhageysi dacwad caddaalad ku dhisan, ay ugu sheegaan cidda dambi loo haysto xogaha ku saabsan fal-dambiyeedka ku lidka ah amaba u xaglinaaya xagooda;
8. Waa in ay hubiyaan oo xaqiijiyaan in caddeymaha dacwadda loohayo ay yihiin kuwo lagu soo heley sifo sharciga ama Dastuurka waafaqsan;
9. Waa in ay diidaan caddaymaha ay ogaadaan in lagu helay sifo sharci-darro ah oo xad-gudub weyn ku ah xuquuqda qofka la hayso, gaar ahaanna caddeymaha lagu heley jidh-dil ; Waan in ay xaqiijiyaan in talaabo sharci ka qaadaan cidda sifada sharci-darrada ah u adeegsatey helista caddaymahaasi;
10. Haddii inta lagu guda jiro diyaarinta dhageysiga dacwadda ama mar lagu guda jiro dhageysiga dacwad ay ogaadaan xog tusinaysa jiritaanka fal dambiyeed lagaley oo aan la soobaadhin ama aan horey la oogin, waa in ay sida ugu dhakhsoha badan leh ula socodsiyaan Booliiska oo qoraal ahaanna ku siiyaan faah-faahinta fal dambigaasi.

## QAYBTA SADDAXAAD
## ASBAABAHA ANSHAX-MARINTA GARSOORAHA IYO XEER-ILAALIYAHA

### QODOBKA 11AAD: ASBAABAHA KEENA ANSHAX-MARINTA GARSOORE

Asbaabaha keena Anshax-marin Garsoore waxa ay noqon kartaa:

- b. asbaab anshax-marin fudud, ama
- t. asbaab anshax-marin culus

### *11. B. ASBAABAHA ANSHAX-MARINTA FUDUD*

Asbaabahan soo socda waxa ay yihiin falal anshax-marin fudud oo dhalin kara tallaabo anshax-marineed oo dhan ka ah garsooraha:

1. Garsooraha oo, isagoon haysan sabab looga garaabo,ka baaqda ama diida in uu ka qayb galo tabobar, siminaar ama aqoon isweydaarsi uu Garsoorku qaban qaabiyey oo loogu talogalay in kor loogu qaado aqoonta sharci iyo xirfadda garsooreyaasha.

2. Garsooreha oo isagoon haysan sabab macquul ah oo sharciga waafaqsan dib u dhiga ama ba u qabta muddooyin badan balanta dhageysiga dacwad maxkammadda hortaala, ama aan u cayimin balan la dhageysto dacwad uu mas'uul ka yahay.
3. garsooraha oo isaga oo ku guda jiro dhageysiga dacwad ku kaca fal amaba la yimaado hab dhaqan wax u dhimaya dhawrsoonaanta ama sharafta garsoorka;
4. garsooraha oo ka gaabsada in uu u digo amaba uu saxo, oo markay lagama maarmaan tahayna talaabo sharci ka qaado daraf kamida dhinacyada dacwad ee ku kaca fal aan habooneyn amaba la yimaadda habdhaqan aan habooneyn; ama garsooreha oo ka gaabsada in uu sidookale u digo ama saxo, oo talaabo sharciga waafaqsan ka qaado markay lagama maarmaan tahay darafyada dacwadda ee ka soo qayb gala dhageysiga dacwadda isagoon soo diyaar garoobin oo ay muuqato in uu kutalogalay in ay daahdo soo afjarista dacwadda ee maxakamaddana u sheega sababo aan garawshiyo lahayn;
5. garsooraha oo ka gaabsada in uu sidulqaad leh u dhageysto doodaha dhinacyada dacwadda; ama ku gafa karaamada iyo sharafta dhinacyada dacwadda.;
6. garsooraha oo ka gaabsada in, si waafaqsan nidaamka iyo habka xeerka shaqo ee garsoorka, uu waajibaadkiisa shaqo u guto si ay ku dheehan tahay iskaashi iyo wadashaqeyn uu la yeesho cida ay shaqo wadaagta yihiin iyo shaqaalaha kale ee garsoorka;
7. garsooraha oo ka gaabsada in uu u digo ama ba uu saxo, oo markay lagama-maarmaan tahayna talaabo sharci ka qaado shaqaaleha fadhi garsoorka ee sixun u dhaqma, amaba xilkooda shaqo u adeegsada danahooda gaar ka ah ama danta cid kale;
8. gasooraha oo la yeesha shaqaalaha maxkamadda xidhiidh saameyn ku yeelan kara xilka shaqo iyo karaamada garooreha lafttisa;
9. garsooreha oo shaqada uga maqnaada fasax la'aan isagoon haysan sabab caqli gal ah;
10. garsooraha oo, isagoon hayn sabab loogu garaabo, diida dhageysiga dacwad lagu qoray ama ka gaabsada inuu diiwaan galiyo sababta ama diiwaan galiya sabab been ah oo uu uga noday sii wadista dhageysiga dacwad uu hayey;
11. garsooraha oo, isagoon hayn sabab loogu garaabo, diido inuu fuliyo hawlkale oo garsoor oo uu u xilsaaray masuul isaga ka sareeya si sharciga waafaqsan;
12. garsooraha oo , iyadoo aysan jirin wax u diidaya, ka gaaabsada in uu dacwad uu hayo ku dhagasto maxkamad dadweynaha u furan;
13. garsooraha oo gala hawlo ama danaysi gaar ahaaneed oo khilaafsan waajibaadkiisa and karaamadissa garsoorenimo;

### *11.T. ASBAABAHA ANSHAX-MARIN CULUS*

Asbaabahan soo socda waxa ay yihiin falal anshax-marin culus oo dhallin kara talaabo anshax-marineed ka dhan ka ah garsooreyaasha;

1. Haddii sida laga dheegan karo gar-maqalka dacwadda ay muuqato in Garsoorahu uu si ula kac u ah uu falay caddaalad darro isagoo baal-maray inuu dabaqo Qodobada xeerka khuseeya dacwadda si uu ugu u waxyeleeyo amaba ugu daneeyo dhinac ka mid ah dhinacyada dacwadda;
2. Haddii garsooruhu uu ku kala fuquuqo dhinacyada dacwadda eex ku salaysan qabiil, dhalasho, jinsi, siyaasad, mansab, bulso ama sababo kale darteed;
3. Haddii iyadoo lagu guda jiro dhagaysiga dacwadda uu garsooruhu gacan u qaaday ama isku dayo in uu u gacan qaado garsoore, shaqaalaha maxkamadda ama dhinacyada dacwadda
4. Hadii ay dhacdo in qolka dhagaysiga dacwadaha dhexdiisa uu garsooruhu dagaalo/ u hanjabo ama isku dayo in uu dagaalo shaqaaleha maxkamadda ama dhinacyada dacwadda, amaba uu dadkaasi caayo ama si xun ula hadlo iyadoo lagu guda jiro dhagaysiga dacwadda;
5. Hadii uu garsooruhu ka gaabsado in uu si dhakhso ah uu diiwaan galin waayo fikirkiisa gaar ka ah(dissenting opinion) isagoo ku talo galay in uu daahiyo ku dhawaaqista xukunka Maxkamadda, amaba uu dhaleeceeyo shakhsiyadda iyo sharafta garsooreyaasha kale halkii uu ka sheegi lahaa sababta aanuu u waafaqaynin go'aan kooda;
6. Hadii garsooruhu, kahor inta aysan maxkamaddu u akhriyin go, aankeeda dhinacyadda oo goob jog ah, uu cid u sheego go'aanka dacwadda;
7. Haddii garsooruhu isagoo og ama ay ahayd in uu ogaado uu dhageysto dacwad uu dhagaysigeeda xeerku ka mamnuucay;
8. Haddii garsooruhu si toos ah ama si dadban uga qaato ama isku dayo inuu uga qaato laaluush, hadyad ama deeq kale cid dhan ka ah ama danaynaysa dacwad maxkamadda hortaala ama dacwad maxkamadda la horkeeni doono ama dacwad maxkamaddu horey u go'aamisay;
9. Hadii uu garsooruhu uu si ula kac ah u adeegsado xilkiisa iyo awoodiisa garsoor si uu ugu danaysto, ama si uu xaq-darro ugu fuliyo daraf dacwadda ka tirsan amaba cid kale ama si uu cidkale u duudsiyo xaqooda;
10. Haddii gasooruhu, isagoo haya xilka garsoorenimo, uu xubin ka noqdo xisbi ama urur siyaasaddeed;
11. Haddii uu garsooruhu karti xumo iyo aqoon-darro darteed uu kari waayo in uu dabaqo xeerka ay tahay in la dabaqo, taasina ay dhaliso in garsooruhu soo saari kari waayo go'aan cadaalad ku dhisan ama in uu garsooruhu uu caqabad ku noqdo in Maxkamaddu gaadho go'aan caddaalad ah.
12. Haddii uu garsooraha oo dulucda ama xogaha dacwad uu gacanta ku hayo u sheega ama kala sheekeysta cid aan ahayn garsoore ay dacwadda wada dhageysanayaan; ama ba siiya warbaahinta xog ku saaban dacwadaasi

## QODOBKA 12AAD: ASBAABAHA ANSHAX-MARINTA XEER-ILAALIYE

Falalka dhaliya talaabo anshax-marineed dhan ka ah Xeer-ilaaliye waxa ay noqonkaraa:

1. Fal anshax-marin culus ama

2. Fal anshax-marin fudud.

### 12 (1) Ficilada Hoos Ku Xusan Waxa Ay Yihiin Falal Anshax-marin Culus:

B. in xeer-ilaaliyuhu dalbado ama qaato laaluush;
T. in Xeer-ilaaliyuhu eexdo si ay isaga dan gaar ahi ugu jirto ama ugu daneeyo cid kale;
J. In Xeer-Ilaaliyuhu sameeyo qoraal been abuur ah oo ay isaga dan gaar ahi ugu jirto ama ugu daneeyo cid kale;
X. In xeer-ilaaliyuhu lacag ka amaahdo qof ay khusayso ama meel ka soo galaya gudashada waajibaadkiisa shaqo;
KH. In xeer-ilaaliyuhu uu si ula kac ah ama xilkasnimo-darro ah u qariyo ama uga gaabsado in uu sheego ama bandhigo xog ama arrin ogaalkiisa ah, taasina ay sababto in la qaato go'aan khaldan;
D. In Xeer-Ilaaliyuhu sababo luggooyo la soo darista dadweynaha oo uu daahiyo fulinta hawshiisa xeer-ilaalineed iyadoo aysan jirin sabab caqli gal ah oo uu cuskado;
R. In xeer-ilaaliyuhu isagoon fasax ama sabab caqli gal ah heysan uu caadeysto in uu shaqada ka maqnaado;
S. In xeer-ilaaliyuhu uu goobta shaqada isagoo jooga ku kaco fal ama dhaqan dhan ka ah caadada iyo hab-dhaqanka wanaagsan ee bulshada;
SH. In xeer-ilaaliyuhu si ula kac ah ama xilkasnimo darro ah u waxyeeleeyo hantida xafiiska;
DH. In xeer-ilaaliyuhu diido ama iska dhegotiro in uu fuliyo amar cad oo qoraal amaba afka ah oo uu ka heley mas'uul isaga ka sareeyaa ama Xeer-Illaiyaha Guud si sharciga waafaqsan, isagoon haysan cudur-daar sharciga waafaqsan;
C. In xeer-ilaaliyuhu addeegsado oo uu maxkamadda u bandhigo caddeymo aan sharciyan la aqbali karin oo uu ogyahay, ama ay ahayd in uu ogaado, in lagu heley sifo sharci daro ah, gaar haanna jidh-dill; ama uu ka gaabsado in uu talaabo sharciga waafaqsan ka qaado cidda masuulka ka ahayd caddeymaha lagu heley sifo aan sharciga ama dastuurka waafaqsanay;
G. inuu Xeer-Ilaaliyahu ku biiro ama xubin ka noqdo xisbi siyaasaddeed, ama ugu ololeeyo si muuqata tageerada xisbi siyaasaddeed.
F. in xeer-ilaaliyuhu si ula kac ah u faly caddalad darro isagoo baal maray inuu ku dabaqo qodobada ku haboon dabiga uu oogay ee ay taagerayaan caddaymaha faylku.
Q. in xeer-ilaaliyuhu ku kala faquuqo dhinacyada eex ku salaysan sida: qabiil, dhalasho, hanta, mansab, hanta, deegaan, jinsi iwm.
K. in xeer-ilaayuhu mudada dhagaysiga dacwadda gacan u qaado ama isu dayo inuu gacan u qaado mid ka mid ah garsoorayaasha, shaqaalaha garsoorka, booliska ama dhinacyada dacwadda.
L. Fal kasta oo kale oo loo arko in uu yahay fal anshaxxumo oo la culays ah kuwan kor ku xusan

### 12 (2) Ficilada Hoos Ku Xusan Waxa Ay Yihiin Fal Anshax-marin Fudud:

Ficiladan hoos ku xusan waxa ay noqonayaan kuwo keena tallaabo anshax marin fudud oo dhan ka ah xeer-ilaaliyaha:

b. Haddii uu shaqada u gudan waayo si ay ku dheehan tahay dadaal iyo xilkasnimo;
t. Haddii uucarqaladeeyo habsami u socodka shaqada ama ka gaabsada in uu gacan siiyo lana shaqeeyo hawlwadeenada ay shaqo wadaagta yihiin;
j. Haddii uu caadeysto in uu wax ka amaahdo cid si toos ah ama si dadban dan uga leh dacwad uu gacanta ku hayo ;
x. Haddii uu sheego ama bixiyo xog ama ka waramo geedi-socodka dacwadda ama wax kasta oo loo tixgaliyey inay tahay sir, ugana waramo cid kale oo aan ahayn dadka sharcigu u ogolaanayo inay ogaadaan ama aanu jirin amar sharci ah ee masuul ka sareeya; ama
Kh. Haddii ku kaca fal kale oo u dhiganta anshax darro fudud.

**QODOBKA 13AAD: ASBAABAHA FAL MAAMUL XUMO**

Iyadoo ay sidooda ahaanayaan dabaqista Qodobada 11 iyo 12 ee Xeernidaamiyahan, ayay haddana sababahan soo socda noqonayaan asbaabo fal maamul xumo oo dhalin kara talaabo anshax oo dhan ka ah Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Racfaanada, Gobolada iyo Degmooyinka, iyo Ku xigeenada Xeer Ilaaliyaha guud ee mas'uulka ka ah xafiisyada Xeer Ilaalinta ee heer gobol:

1. Hadii uu kala faquuqo ama la kala jecleysto garsooreyaasha iyadoo aanay jirin sabab cad oo caqli gal ahi;
2. Haddii uu ka gaabsasho hagista ama agaasimidda hawlaha garsoorka oo horseeda waxyeelo soo gaadha danaha dhinacyada ama adeegga dadweynaha;
3. Haddii iyadoo la soo gaadhsiiyey oo la ogaysiiyey jiritaanka gaf laga galay anshaxa garsoorka, uu ka gaabsado in si waafaqsan Xeernidaamiyahanin uu dabo galo si tallaboda sharci ee ku haboon laga qaado cidda ay khusayso; ama
4. In laga gaabsado fulinta amar sharci ah oo uu amray Guddomiyaha isaga darajo ahaan ka sareeya

**QAYBTA 4AAD**
**BILAWGA, BAADHISTA IYO GO'AAMINTA DACWADAHA ANSHAX GARSOOREYAASHA IYO XEER-ILAALIYEYAASHA**

**WAAXDA 1AAD**
**GUDBINTA IYO BAADHISTA CABASHOOYINKA**

**QODOBKA 14AAD: BILAWGA DACWADDAHA ANSHAXA**

1. Qofkasta oo ka cabanaya fal anshax xad gudub ku ah xeer nidaamiyahan oo uu ku kacay garsoorewaxa uu xaq u leeyahay in warbixin ama cabasho qoraal ah oo qeexaysaa arrintaasi uu u gudbiyo Guddoomiyaha Maxkamadda ay cabashadu khusayso ama Guddoomiyaha maxkammadda RacfaankaGobolka cabashadu khusayso ama Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama Xafiiska Guddiga Caddaaladda;

2. Qof kasta oo ka cabanaya fal anshax xad gudub ku ah xeer nidaamiyahan oo uu ku kacay xeer ilaaliye waxa uu xaq u leeyahay in uu cabasho qoraal ah oo qeexaysaa arrintaasi u gudbiyo Ku-xigeenka Xeer Illaiyaha Guud ee mas'uulka ka ah cidda laga cabanayo ama Xeer ilaaliyaha Guud ama Xafiiska Guddiga Caddaaladda.

3. HaddiiGuddoomiyaha Maxkamadda ay khusayso ama ku xigeenka xeer-ilaaliyaha mas'uulka ka ah xafiiska Xeer Illainta ee ay khusayso uu iskii u ogaado fal lid ku ah xeer nidaamiyahan anshaxa oo uu ku kacay garsoore/xeer-ilaaliye waxa ku waajib ah in uu billaabo dacwad anshax marineed oo dhan ka ah cidda ay khusayso.

**QODOBKA 15AAD: BAADHIS HORDHAC AH IYO HANNAANKA BAADHISTA**

1. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanku , ama Xeer-ilaaliyaha guud ama Ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud marka ay helaan cabasho ama warbixin dhan ka ah Xee-rilaaliye waa in uu baadhis hordhac ah ku sameeyaan arintasi si waafaqsan Qodobka 14aad ee Xeernidaamiyahan.

2. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka, ama Xeerilaaiyaha Guud ama Ku xigeenka Xeerilaaliyaha Guud ee ay ku waajibtay in uu sameeyo baadhis hordhac ahi waxa uu awood u leeyihay in uu baadho oo eego diiwaaanada, galdacwadeedka iyo dhukumentiga kale ee la xidhiidha cabashada uu baadhayo.

**QODOBKA 16AAD: GUDBINTA NATIIJADA BAADHISTA HORDHACA AH**

***QOD16 (B): BAADHISTA HORDHAC AH EE CABASHADA KHUSEEYA GARSOOREYAASHA***

1. Guddoomiyaha maxkammadda Gobol ama Degmo ee ay soo gaadho cabasho ama warbixin ku saabsan fal dhan ka ah anshaxa garsoore, waa in uu ugudbiyo dacwad anshax guddoomiyaha maxkamadda racfaanka ee Gobolka ay khusayso.

2. Guddoomiyaha Maxkamadda racfaanka ee ay soo gaadho cabasho ama warbixin ku saabsan fal dhan ka ah anshaxa garsoore, ama dacwad anshax loogu soo gudbiyay si waafaqsan Qodob-hoosaadka 1aad ee Qodobkani, waa in uu:

   b. Baadho arinta una gudbiyo dacwadaasi Guddiga Caddaaladda haddii uu arko in uu jiro fal anshax xumo garsoor oo la galay;
   
   t. Buriyo cabashada, hadii uu arko inaanay jirin fal anshax xumo garsoor oo dhacay kadib marka uu baadhista ku sameeyey.

3. Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanku, haddii uu u buriyo cabashada si waafaqsan Qodob hoosaaadka 2(t) ee Qodobkan, waa in uu uu u gudbiyo Guddoomiyaha

Maxkammadda sare iyo Guddiga Caddaaladda warbixin faahfaahsan oo qoraal ah oo sheegeysa cabashada ama warbixinta fal anshax-xumada garsoor ee la soo gaadhsiiyey, talaabooyinka baadhiseed ee la qaadey, natiijada baadhista ka soo baxdey iyo sababta uu u buriyey cabashadaasi. Guddiga Caddaalaaddu, kadib marka uu helo warbixinta Guddoomiyaha Maxkammadda Racfaanka ee uu sidookalena dhageysto aragtida uu Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ka qabo arrintaasi, waxa uu ansixin warbixintaasi ama wuxuu arinta ku wareejinayaa Guddiga Dabo Galka iyo kormeerka Garsoorka si ay baadhis dheeraad ah ugu sameeyaan arinta.

4. Haddii cabashada ama warbixinta loo gudbiyo Guddoomiyaha Maxkammadda Sare, Guddoomiyuhu waa uu in uu:

b. arinta u gudbiyo Guddoomiyaha Maxkamdda Racfaanka ay khusayso; ama
t. baadho arinta oo uu buriyo cabashada haddii uu u arko inaanay jirin fal anshax xumo garsoor oo dhacay ama lagalay; ama
j. Haddii uu u arko in uu jiro fal dhan ka ah anshaxa garsoorka oo dhacay, u gudbiyo arrinta Guddiga Caddaaladda si ay loogu sii gudbiyo Guddiga Dabogalka iyo Kormeerka Garsoorka si ay baadhis dheeraad ah u sameeyaan.

5. Guddoomiyaha Maxkammadda Sare, haddii uu u buriyo cabashada si waafaqsan Qodob hoosaaadka 4(t) ee Qodobkan, waa in uu uu u gudbiyo Guddiga Caddaaladda warbixin faahfaahsan oo qoraal ah oo sheegeysa cabashada ama warbixinta fal anshax-xumada garsoor ee la soo gaadhsiiyey, talaabooyinka baadhiseed ee uu qaadey, natiijada baadhista ka soo baxdey iyo sababta uu u buriyey cabashadaasi. Guddiga Caddaalaaddu, kadib marka uu helo warbixinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, waxa uu ansixin warbixintaasi ama wuxuu arrinta ku wareejinayaa Guddiga Dabo Galka iyo kormeerka Garsoorka si ay baadhis dheeraad ah ugu sameeyaan.

### *QOD.16 (T): BAADHISTA HORDHACA AH EE CABASHADA KHUSAYSA XEER-ILAALINTA*

1. Ku xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee ay soo gaadho cabasho ka dhan ah Xeer-Ilaaliye uu mas'uul ka yahay , waa in uu:

b. Baadhis hor dhac ah ku sameeyo cabashada la soo gaadhsiiyey una gudbiyo dacwadaasi Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo Guddiga Caddaaladda haddii uu arko in ay jiraan xogo muujinaya in la galay fal dhan ka ah anshaxa oo mudan in la baadho isagoo raacinaaya warbixin faahfaahsan oo qoraal ah oo sheegeysa cabashada la soo gaadhsiiyey, talaabooyinka baadhista hordhaca ah ee uu qaadey iyo natiijada baadhista ka soo baxdey.
t. Buriyo cabashada, hadii uu arko inaanay jirin wax muujinaya in uu dhacay fal anshaxa dhan ka ahi kadib marka uu baadhsita ku sameeyey una gudbiyo Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo Guddiga Caddaaladda warbixin faahfaahsan oo qoraal ah oo sheegeysa cabashada la soo gaadhsiiyey, talaabooyinka baadhiseed ee uu qaadey,

natiijada baadhista ka soo baxdey iyo sababta uu u buriyey cabashadaasi. Sidoo kalena waa in cidda cabashada u soo gudbisay uu qoraal ku siiyo go'aanka uu ku buriyay cabashada oo sababaysan.

2. Guddiga Caddaalaaddu, kadib marka uu helo warbixinta uu u soo gudbiyo Ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee uu sidoo kalena dhageysto aragtida uu Xeer-Ilaaliyah Guud ka qabo arrintaasi, waxa uu:

b. ansixin go'aanka burinta cabashada ee Ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud; ama

t. Waxa uu Guddiga dabogalka iyo Kormeerka ku wareejinayaa cabashada iyo warbixinta laga heley ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud si ay baadhis dhameystiran ugu sameeyaan arinta laga cabanaayo.

3. Xeer Ilaaliyaha Guud, haddii cabashada loo gudbiyo, waa in uu:

b. arrinta u gudbiyo Ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee mas'uulka ka ah cidda cabashadu khusayso; ama

t. baadho arrinta oo uu buriyo cabashada haddii uu u arko in aanay jirin fal dhanka ah anshaxa oo la galay; ama

j. Haddii uu u arko in uu jiro fal dhan ka ah anshaxa oo dhacay, u gudbiyo arrinta Guddiga Dabogalka iyo Kormeerka Garsoorka si ay baadhis dheeraad ah ugu sameeyaan cabashada.

4. Xeer-ilaaliyaha Guud, haddii uu u buriyo cabashada si waafaqsan Qodob hoosaaadka 3(t) ee Qodobkan, waa in uu uu u gudbiyo Guddiga Caddaaladda warbixin faahfaahsan oo qoraal ah oo sheegeysa cabashada la soo gaadhsiiyey, talaabooyinka baadhiseed ee uu qaadey, natiijada baadhista ka soo baxdey iyo sababta uu u buriyey cabashadaasi. Guddiga Caddaalaaddu, kadib marka uu helo warbixinta Xeer Ilaaliyaha Guud, waxa uu ansixin warbixintaasi ama wuxuu arrinta ku wareejinayaa Guddiga Dabo Galka iyo kormeerka Garsoorka si ay baadhis dheeraad ah ugu sameeyaan.

## QODOBKA 17AAD: XAQA HELISTA NUQULKA CABASHADA IYO GO'AANKA BURINTA CABASHADA

1. Masu'uulka xeer ilaainta ama maxkamdda ee ay ku waajibtay in uu baadhis hordhac ah sameeyaa, waa in u siiyo garsooraha ama xeer ilaaiyaha cabashadu khusyaso nuqul ka mid ah cabashada laga soo gudbiyay.

2. Mas'uulka baadhis hordhac sameeyey ee qaatey go'aan uu ku burinayo cabashada si waafaqsan Qod 16aad ee Xeer nidaamiyahani, waa in uu nuqul ka burinta cabashada oo sababysan siiyo cidda cabshada soo gudbisatey.

## QODOBKA 18AAD: MUDDADA BAADHISTA HORDHACA AH

1. Guddoomiyaha Maxkamadda Gobol ama Degmo ee hela cabasho dhan ka ah garsoore uu mas'uul ka yahay, waa in uu muddo aan ka badnayn Shan (5) casho gudahood oo kabilaabanta maalinta uu helay cabashada ama warbixinta ugu gudbiyo arinta Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka ay khusayso.

2. Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka ee ay soo gaadho cabasho dhan ka ah garsoore, waa in uu toban (10) casho gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta arrintu soo gaadhay, ku dhameeyo baadhista oo islamarkaana qaado talaabada ku haboon ee waafaqsan sida ku cad Qod.16.B(2 &3) ee Xeernidaamiyahan . Haddii cabashada la soo gaadhsiiyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, waa in uu Guddoomiyuhu, toban (10) casho gudahood oo ka billabanta maalinta uu heley cabashada ugu gudbiyo arinta maxkamadda Racfaanka ay khusayso ama uu ku dhammeeyo baadhista hordhaca ah oo uu qaado talaabada ku haboon ee waafaqsan sida ku cad Qod.16.B(4&5) ee Xeer nidaamiyahan.

3. Ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee hela cabasho dhan ka ah xeer-ilaaliye uu mas'uulka yahay, waa in uu toban (10) casho gudahood oo ka bilaabanta maalinta uu heley cabashadaasi ku dhameeyo baadhista hordhaca ah oo uu qaado talaabada ku haboon ee waafasan sida ku cad Qod.16.T(1) ee Xeer nidaamiayan.

4. Marka ay Xeer-Ilaaliyaha Guud soo gaadho cabasho ama warbixin dhan ka ah Xeer-ilaaliye, waa in uu toban (10) casho gudahood oo ka bilaabanta maalinta uu heley cabashada ugu gudbiyo arinta Ku xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee mas'uulka ka ah xafiiska ay cabashadu khusayso ama Kormeerka iyo Dabogalka, ama uu buriyo cabashada oo u gudbiyo Guddiga Caddaladda warbixin waafaqsan Qod.16.T(3 & 4) ee Xeer nidaamiyan

**QODOBKA 19AAD: KORMEERKA IYO DABOGALKA, IYO HANAANKA DHAMAYSTIRKA BAADHISTA**

1. Iyadoo aan wax loo dhimaynin xaaladaha ku cad Qod. 16.B(2.t, 3.j & 5.t) iyo Qod.16.T (2.t & 5j) ee Xeernidaamiyahan, kormeerka iyo Dabogalku waxa kale oo uu awood u leeyahay in :

   b. Uu Siwaafaqsan awaamiirta uu siiyo Guddiga Caddaaladdu , baadhis ugu sameeyo cabasho kasta oo khusaysa anshaxa xeer-ilaaliyeyaasha iyo garsooreyaasha ,haddi ay cabashadaasi tahay mid si toos ah loogu soogudbiyay Xafiiska Guddiga Caddaaladda; ama

   t. Uu isaga laftiissu bilaabo baadhista, haddii ay ogaadaan jiritaanka xadgudub laga galay Xeernidaamiyahan.

2. Marka uu Kormeerka iyo Dabogalku baadhis ku samaynaya cabasho ku saabsan ku xad gudub anshax , baadhistaasi waa in ay sameeyaan koox Kormeerka ka tirsan oo ka

kooban Guddoomiyaha kormeerka iyo labo kormeere oo uu magacaabo Guddiga Caddaaladdu.

3. Iyadoo xaalada uu xeerinayao Qodob hoosaadka 2aad ee Qodobkani ay sidaasi tahay, ayaa haddana laba kormeere oo kali ah loo xilsaari karaa, haddii ay lagama maar maan noqoto, ururinta caddaymaha iyo xogaha. Hase yeeshee, natiijada kama-dambaysta ah ee baadhista ee ay tahay in loo gudbiyo Guddiga Caddaaladda waa in ay saxeexaan saddex kormeere.

4. Xubnaha Kormeerka iyo Dabagalku, marka ay samaynayaan baadhista, waxa ay awood u leeyihiin in ay:

b. Baadhaan oo eegaan diiwaaanada, gal-dacwadeedka iyo dhokumentiga kale ee la xidhiidha cabashada la baadhayo; iyo
t. In ay wareystaan garsooreha ama xeer-ilaaliyaha laga cabanayo ama cid kasta oo baadhistu gasho oo ay qaadaan talaabo kasta oo lagama maarmaan u ah ka gun gaadhsita baadhista.

**QODOBKA 20AAD: MUDDADA IYO GUDBINTA NATIIJADA BAADHISTA KORMEERKA IYO DABO GALKA**

1. Xubnaha Kormeerka iyo dabogalku waa in ay warbixinta iyo natiijada ka soo baxday baadhista ay sameeyeen oo qoraal ah u gudbiyo Guddiga Caddaaladda.

2. Warbixinta ay u gudbinayaan Giddiguna waa in ay noqoto mid qoraal ah oo faahfaahinaysa cabashada ama warbixinta soo gaadhey ama loo xilsaarey in ay baadhaan, talabooyinka badhiseed ee ay qaadeen iyo dokumenti xoojinaya natiijada baadhistooda, haddii ay jirto.

3. Warbixinta iyo natiijada baadhista ee ay ugudbinayaan Guddiguna waa in ay noqoto mid ay wada saxeexeen saddexda kormeere ee baadhista loo sameeyey. Haseyeeshee, Xubin kasta oo ka mid ah xubnaha Kormeerku waxa uu xaq u leeyahay waajibna ku ah in, haddii uu qabo fikir ka duwan ka ay ku go'aan qaataan xubnaha kale ee kormeerku, uu fikirkiisaasi dhiibto iyadoo qoraal ah oo lagu lifaaqo go'aanka xubnaha Kormeerka iyodabagalku qaato.

5. Xubnaha Kormeerka iyo dabagalku waa in ay ku dhameeyaan baadhista uguna gudbiyaan warbixinta iyo natiijada ka soo baxda baadhista Guddiga Caddaaladda muddo aan ka badnayn soddon (30) casho gudahaood oo ka bilaabanta maalinta la soo gaadhsiiyey ama loo xil saaray baadhista cabashada .

**WAAXDA 2AAD**
**HANNANKA DHAGEYSIGA IYO GO'AAN KA GAADHISTA DACWAD ANSHAXA**

**QODOBKA 21AAD: BILAWGA DHAGAYSIGA IYO MUDDADA GO'AAN KA GAADHISTA DACWAD ANSHAX**

1. Marka Guddiga Caddaaladdu helo warbixinta iyo natiijada ka soo baxda baadhista Kormeerka iyo Dabo-galka, waa in Guddidu muddo todoba (7) casho gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta warbixintu soo gaadhay ay nuqul asal ah oo warbixintaasiya ugudbiso Xeer ilaaliyaha Guud kuna amarto in uu Guddiga ka soo hor oogo dacwad anshax marinta.

2. Xeer-Ilaaliyah Guud waa in uu muddo todoba (7) casho gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta uu heley warbixinta iyo amarka Guddiga Caddaladda ee waafaqsan Qodobhoosaadka (1) ee Qodobkan dacwad anshax marineed oo dhan ka ah cida ay khusayso u soogudbiyo Guddiga Caddaaladda kana codsado Guddigu in ay bilawdo dhageysiga Dacwaddaasi.

3. Guddiga caddaaladdu waa in , muddo aan ka badnayn soddon (30) casho gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta uu Xeer-Ilaaliyaha Guud u soo gudbiyay dacwadda anshaxmarinta, ay go'aan uga gaadho dacwadaasi.

**QODOBKA 22AAD: HABKA QAADISTA DACWADAHA ANSHAXA**

1. Guddiga Caddaaladdu, ka hor inta aanuu go'aan ka gaadhin arrinta, waa in uu ku wargaliyo arrinta xeer-ilaaliyaha ama garsooraha cabashadu khusayso oo uu ku amro in uu ka soo jawaabo cabashadaasi. Wargalintaasina waa in ay noqoto qoraal sicad u qeexaya faahfaahinta dacwadda loo haysto iyo amar cad oo faraya garsooreha ama xeer-ilaaliyaha in uu muddo iyo goob cayiman yimaado si uu isku difaaco;

2. Garsooreha ama xeer-ilaaliyaha dacwaddu khusayso way u banaan tahay in uu isagu ka soo qayb-galo dhagaysiga dacwadda si uu isu difaaco amaba uu cid kale u soo wakiisho;

3. Hadii uu garsooruhu ama xeer-ilaaliyuhu ka baaqsado in uu ku yimaado muddo shan iyo toban (15) casho gudahood ah si uu isku difaaco,Guddiga Caddaaladda waa in, kadib marka ay xaqiijiso in yeedhista ku xusan Qodob hoosaadka (1) ee Qodobkan la gaadhsiiyey xeer ilaaliyaha ama garsooreha, ay bilawdo oo ay go'aan kagaadho dacwadda isaga oo maqan.

**QODOBKA 23AAD: GO'AANKA GUDDIGA CADDAALADDA**

1. Guddigu marka uu dhagaysto dacwadda ee uu si haboon uga dooddo, waa in uu:

b. Buriyo dacwadda, haddii ay xaqiiqsato in aanay jirin caddeymo muujinaya in uu dhacay fal xad-gudub ku ah anshaxa iyo mas'uuliyadaha xirfadlenimo ee uu dhigayo xeernidaamiyahani; ama

t. Ka qaado cidda ay khusayso talaabada anshaxmarineed ee ku haboon ee waafaqsan Qodobada Qaybta Shanaad ee Xeernidaamiyahan, haddii ay u caddaato in la galey fal xad gudub ku ah anshaxa iyo mas'uuliyadaha xirafdlenimo ee uu dhigayo xeernidaamiyahan.

2. Guddigu waa in uu go'aankiisa qoraal ahaan ku siiyo garsooraha ama xeer-ilaaliyaha ay khusayso.

3. Guddiga Caddaaladdu, marka uu ka go'aan gaadhayo dacwad anshax-marineed, waa in uu tixgalinsiiyo xaaladda iyo sida uu u dhacay falku; iyo heerka aqooneed iyo waayo-aragnimada shaqo, muddada uu shaqeeynayay iyo sumcadda garsooraha ama xeer-ilaaliyaha dacwaddu khusayso.

**QODOBKA 24AAD: DIB U EEGISTA GO'AANKA ANSHAX-MARINTA**

1. Garsooraha/xeer-ilaaliyaha ay khusaysaa waxa uu xaq u leeyahy in uu, muddo shan iyo toban (15) casho guddahood ah oo ka bilaabanta maalinta uu helay go'aanka, u gudbisto Guddiga cadddaladda codsi qoraal ah oo sababeysan oo uu kaga codsanayo in ay dib u eegaan go'aankooda.

2. Guddiga Caddaaladdu waa in uu, muddo aan kabadnayn toban (10) casho kadib maalinta uu soogaadhay codsiga dib uu eegistu, kaga go'aan gaadho dib u eegistaasi.

3. Go'aanka dib u eegista ee Guddiguna waa kama dambayn.

**QAYBTA SHANAAD**
**ANSHAX-MARINTA GARSOOREYAASHA IYO XEER-ILAALIYEYAASHA**

**QODOBKA 25AAD: UJEEDDA IYO FULINTA TALAABOOYINKA ANSHAX-MARINTA**

1. Ujeeddada guud ee anshaxmarinta garsooreha iyo xeer ilaaliyuhu waa in la saxo ka qaldan, in ay cashar u noqoto kuwa kale iyo in ka saxmi waaya laga saaro Garsoorka.

2. Garsooreha ama xeer-ilaaliyaha dayaca ama ka gaabsada gudashada waajibaadkiisa shaqo, ama ku xad-gudba anshaxa iyo mas'uuliyadda garsoorenimo ama xeer-ilaalinnimo waxa uu mutaysan doonaa talabooyinka anshax marineed ee Xeer nidaamiyahani dhigayo.

3. Talaabooyinka anshaxmarineed ee loo qaado si waafaqsan xeer nidaamiyahan, kama reebayaan cidda ay khusayso in lagu soo oogo dacwad ciqaab ah oo lagu rido xukun ciqaab ah oo uu mutaysto.

**QODOBKA 26AAD: TALAABOOYINKA ANSHAX-MARINEED.**

1. Garsooreha ama Xeer-Ilaliyaha ku xad-gudba Xeernidaamiyahan, waxa dacwadiisaasi looga go'aan gaadhi doonaa si waafaqsan nidaamka anshax-marinta ee ku cad xeer nidaamiyahan.

2. Talabooyinka anshax-marineed ee laga qaadi karo garsooreha ama Xeer-Ilaaliyaha lagu helo inuu ku xad-gudbay anshaxa iyo mas'uuliyadaha xirfadlenimo ee xeer nidaamiyahani dhigayo, waxa ay noqon karaan kuwan soo socda:

b. Digniin af ama qoraal ah;
t. Ganaax aan ka badnayn hal bil mushaarkeed;
j. Ganaax gaadhaya laba ilaa saddex bilood mushaarkood;
x. hal darajo oo hoos loo celiyo; ama
kh. eris.

3. Lacgta ganaax ahaanta loo qaado waa in si waafaqsan amarka uu bixiyo Guddiga Caddaaladu loogu shubo qasanadda dhexe ee Dawladda

**WAAXDA 1AAD**
**ANSHAXMARINTA XEER-ILAALIYEYAASHA**

**QODOBKA 27AAD: TALAABOOYINKA LAGA QAADAYO XEER ILAALIYAHA KU KACA FAL ANSHAX-XUMO FUDUD.**

1. Xeer-Ilaaliyaha ay ku caddaato in uu galay fal anshax xad-gudub ku ah Qod.12(2) ee Xeerkan, marka ugu horeysa waxa lasiinayaa digniin af ama qoraal ah. Haddii uu marlabaad ku kaco falkaasina, waxa la ganaaxayaa ganaax gaadhi kara hal bil mushaarkeed. Haddii uu mar saddexaad ku celiyo falkaasina, waxa loo qaadanayaa in uu galey markii labaad ama saddexaad fal anshax xad gudub ku ah Qod 12(1) ee Xeernidaamiyahan, waxaana, iyadoo xaaladda uu falka u galay loo eegayo, laga qaadayaa talaabo anshaxmarineed waafaqsan Qod. 28(2) ee Xeerkan.

2. Xeer-ilaaliyaha ay ku caddaato inuu hal mar ama mar qudha wada galey laba ama dhawr fal anshax oo xadgudub ku ah Qod.12(2) ee Xeernidaamiyahan, waxa marka ugu horeysa la ganaaxayaa ganaax gaadhikara hal bil mushahaarkeeda. Hadii uu markale ku celiyo oo ay ku cadaato in uu galay laba ama in kabadan oo kamid ah falalkaasi uu horey u galayna, waxa laganaxayaa ganaax gaadhi kara laba bilood mushaarkood iyo hal darajo oo hoos loo dhigo. Hadii uu Xeer-Ilaaliyahaasi ay ku caddaato in uu mar saddexaad galey fal ama in kabadan oo kamid ah falalkaasi uu horey u galey, ama fal kale oo xad gudub ku ah Qod. 12aad ee Xeerkan waxa loo qaadanaya inaanuu saxmeynin shaqada ayaana laga eryayaa.

**QODOBKA 28AAD: TALAABOOYINKA LAGA QAADAYO XEER ILAALIYAHA KU KACA FAL ANSHAX-XUMO CULUS.**

1. Xeer-Ilaaliyaha ku kaca fal anshax oo xad gudub ku ah Qod.12(1) ee Xeernidaamiyahan, marka ugu horeysa waxa la ganaaxayaa ganaax gaadhi kara laba ilaa saddex bilood mushaarkood. Haddii uu marlabaad ku kaco falkaasina, waxa la isugu darayaa ganaax dhan laba bilood mushaarkood iyo hal darajo oo hoos loodhigo; haddii uu marsaddexaad ku celiyo fal kaasina shaqada ayaa laga eryayaa.

2. Haddii uu xeer ilaaaliyuhu mar wada galo laba ama dhawr fal anshax oo xad gudub ku ah Qod.12(1) ee xeernidaamiyahan waxa, iyadoo xaaladda loo eegayo, loo qaadanayaa in uu markii labaad ama saddexaad galay fal anshax xumo culus, waxana laga qaadayaa talaabada anshax ee ku haboon ee waafaqsan Qodob hoosaadka (1) ee Qodobkan.

3. Iyadoo sida uu dhigayo Qodob hoosaadyad (1 &2) ee Qodobkani ay sideedaasi is ka tahay, Guddiga Caddaaladu waxa uu karaa in uu shaqada ka eryo Xeer-Ilaaliye hadii ay Guddigu aaminto in, marka loo eego sifaha uu falka u galay, xee- ilaaliyehaasi aanuu mudnayn in uu xilka xeer-ilaaliye-nimo sii hayo.

4. Iyadoo ay sideeda ahaanayaan Qodob hoosaadyada (1, 2 &3) ee Qodobkani, Xeer Ilaaliyaha sitoosa ah ayaa shaqada looga eryayaa haddi uu markii ugu horeysay ku kaco fal anshax xumo xad gudub ku ah Qod.12.1(b ama t ama j ama kh ama c) ee Xeernidaamiyahan.

**WAAXDA 2AAD**
**ANSHAX-MARINTA GARSOOREYAASHA**

**QODOBKA 29AAD: TALAABOOYINKA LAGA QAADAYO FAL ANSHAX-XUMO GARSOORE EE FUDUD**

1. Garsooraha ku kaca ee ay ku caddaato in uu galay fal anshax xad-gudub ku ah Qodobka11.B ee Xeernidaamiyahan, marka ugu horeysa waxa la siinayaa digniin af ama qoraal ah; haddii uu mar labaad ku celiyo falkaasi uu horey u galayna, waxa la ganaaxayaa ganaax gaadhi kara hal bil mushaarkeed; haddii uu mar saddexaad fallkaasi ku celiyana, waxa loo qaadanayaa in uu markii labaad ama saddexaad galey fal anshax culus oo xadgudub ku ah Qododobka 11(T) ee Xeernidaamiyahan, waxaana iyadoo xaaladda loo eegayo la saari doonaa gannax waafaqsan Qod.30(1) ee Xeernidaamiyahan.

3. Garsooraha ay ku caddaato in uu hal mar sameeyay ama wada galay laba ama dhawr fal anshax oo xad gudub ku ah Qodobka11.(B)waxa loo qaadanayaa in uu markii labaad ama saddexaad galey fal xad gudub ku ah Qodobka 11(T) ee xeernidaamiyahan,

waxana iyadoo la tix galinayo xaaladda, la saari doonaa ganaax waafaqsan Qodobka30(1) ee Xeernidaamiyahan.

**QODOBKA 30AAD: TALAABOOYINKA LAGA QAADAYO FAL ANSHAX-XUMO GARSOORKA CULUS**

1. Garsooreha ku kaca ee ay ku caddaato in uu galay fal anshax xad gudub ku ah Qodobka 11(T) ee xeernidaamiyahan, marka ugu horeysa waxa la ganaaxayaa ganaax gaadhi kara ilaa laba bilood mushaarkood iyo in uu waayo dalacaad uu ku heli lahaa muddo laba sanno ah . Haddii uu marlabaad ku kaco falkaasina, waxa la ganaaxayaa laba ilaa saddex bilood mushahaarkood iyo hal darajo oo hoos loodhigo; haddii uu marsaddexaad ku celiyana shaqada ayaa laga eryayaa;

2. Haddii uu garsooruhu mar wada galo laba ama dhawr fal anshax oo xad gudb ku ah Qod. (11.T) ee ee Xeernidaaamiyahan, waxa, iyadoo xaaladda loo eegayo, loo qaadanayaa in uu markiilabaad ama saddexaad galay fal anshax xumo garsoor culus waxana laga qaadayaa talaabo waafaqsan Qodob hoosaadka (1) ee Qodobkan;

3. Iyadoo sida uu dhigayo Qodob hoosaadka (1 &2) ee Qodobkani ay sideedaasi is ka tahay, Guddiga Caddaaladu waxa uu karaa in uu shaqada ka eryo garsoore hadii ay Guddigu aaminto in, marka loo eego sifaha uu falka u galay, garsoorahaasi aanuu mudnayn in uu xilka garsoorenimo sii hayo;

4. Iyadoo ay sideeda ahaanayaan Qodob hoosaadyada (1, 2 &3) ee Qodobkani, Garsooraha si toos ah ayaa shaqada looga eryayaa haddi uu markii ugu horeysay ku kaco fal anshax xadgudub ku ah Qod. 11.T (3 ama6 ama 8 ama 10 ama11) ee Xeernidaamiyahan.

**QODOBKA 31AAD: TALOOBIYIN GAAR AH OO ANSHAX-MARINNED**

Iyadoo uu sideeda is ka ahaanayaam noocyada talaabooyinka anshax-marineed ee lagu qeexay Qodobka 26 ee Xeer nidaamiyahan, Guddiga Caddaladu waxa uu guddoomiyenimada ka qaadi karaa Gudoomiyeha Maxkamad Racfaan ama Maxkamad Gobol ama Maxkamad Degmo ama ku xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee mas'uul ka ah xafiiska Xeer ilaalinta ee Gobolka ee ku kaca fal maamul-xumo ka mid ah kuwa ku cad Qodobka 13 ee Xeernidaamiyahan.

**QODOBKA 32AAD: TALAABOOYIN MAAMUL**

Iydoo aan waxba loo dhimaynin talaabooyinka anshax marineed ee Xeernidaamiyahani dhigayo:

1. Guddoomiyehamaxkamad hoose waxa uu karaa in uu ka joojiyo mushahaarka garsoore uu mas'uulka yahay oo shaqada uga maqnaaday fasax la 'aan iyo sabab

macquul ah la aanteed. Hase yeeeshaa talaabadan waxa la qaadi karaa, hadii guddomiyaha ay khusaysaa uu la socodsiiyo ee uu ku qanciyo Guddoomiyaha maxkamadda sare talaabada uu qaadanayo. Ku xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee mas'uulka ka ah xafiis heer gobol, wax uu karaa in uu ka joojiyo mushahaarka xeer ilaaliye uu mas'uulka yahay oo shaqada uga maqnaaday fasax la'aan iyo sabab macquul ah la aanteed. Hase yeeeshaa talaabadan waxa la qaadi karaa, hadii ku xigeenka Xeer Ilaaliyaha guud ee ay khusaysaa uu la socodsiiyo ee uu ku qanciyo Xeer Ilaiyaha Guud talaabada uu qaadanayo.

2. Guddomiyaha Maxkamadda Sare ama Guddoomiye Maxkamad racfaanka ay khusaysaa waxa uu awoodaa in uu muddo aan ka badnayn soddon (30) casho uu shaqada ka joojiyo garsoore, Xeer Ilaaliyaha Guudna waxa uu awoodaa in uu muddo aan ka badnayn soddon (30) casho xeer ilaaiye ay khusayso dacwad anshax ku lid ah oo baadhisteeda ama dhageysigeedu socdo, haddii ay jirto sabab macquula ah oo muujinaysa in ay caddaalad darro ka dhalan karto haddii uu garsoorehaasi ama uu xeer ilaaliyahaasi sii wato gudashada xilkiisa. Haddii looarko lagama maarmaan in laga kordhiyo muddada shaqo ka joojinta garsooreha ama Xeer ilaaliyaha, waxa waa jib ah in la helo ogolaanshaha Guddiga Caddaaladda.

3. Go'aanka Shaqo ka joojinta garsooreha ama xeer ilaayaha ee loo qaato si waafaqsan Qodob hoosaadka (2) ee Qodobkani saameyn kuma yeelan doono mushaarka garsooreha ama xeer ilaaliyaha ay khusayso.

## QAYBTA LIXAAD
## QODOBO ISKU-DHAFAN

### QODOBKA 33AAD: ANSHAXMARINTA HAWLWADEENADA GARSOORKA

Hawlwadeenada garsoorka anshax marintooda waxa loo raacyaa si waafaqsan Xeerka Shaqaaalaha Dawladda. Hase yeeshe e asbaabahan soo socdaa waxay noqonkaraan sabab dhalin karta in talaabo anshax laga qaado hawlwadeenada garsoorka:

1. Hawlwadeenka ooku xadgudba asbaab ka mid ah asbaabaha anshax marineed ee xeer nidaamiyahani dhigayo oo khusyasa hawlwadeenkaasi shaqadiisa; ama
2. Hawlawdeenka oo ku xadgudba qodobada Xeerka Habka Madaniga ama Xeerka Habka Ciqaabta ee khuseeya furista dacwadaha, rogista ama garaacista xukunnada iyo qaraarada maxkamadda iyo gudbinta racfaanada, ama dhayalsada ilaalinta iyo xafidista galdacwadeedyada iyo dhokumentiyada dacwadda; ama dhayalsada qorista garmaqalka ama ku kaca fal carqalad ku ah dhagaysiga iyo go'aan ka gaadhista dacwadda; ama sababa in uu dheeraado soo afjarka dhageysiga dacwadda ama sababa lugooyo iyo in ay kharsh dheeraad ah galaan dhinacyada dacwaddu; amaka gaabsada in uu fuliyo amar uu siiyay gudoomiyaha maxkamaddu ama garsoore uu la shaqaynayo ama Ku-xigeenka Xeer ilaaliyaha Guud ama Xeer ilaaiye uu la shaqaynayao ama mas'iil kale oo maamul ahaan hoos yimaado.

**QODOBKA 34AAD: GUBASHADA DACWADAHA ANSHAX MARINTA (LIMITATION OF DISCIPLINARY ACTION)**

1. Furista dacwad dhan ka ah fal anshax xumo garsoor fudud way gubaneysaa haddii aan dacwaddaasi lagu furin muddo saddex (3) bilood ah guddahood oo kabilaabanta maalinta uu dhacay falka dacwaddu khusaysaa.

2. Furista dacwad dhan ka ah fal anshax xumo garsoor culus way gubaneysaa haddii aan dacwaddaasi lagu furin muddo lix (6) bilood ah guddahood oo kabilaabanta maalinta uu dhacay falka dacwaddu khusyasaa.

**QODOBKA 35AAD: WAAJIBNIMADA TAAGEERISTA BAADHISTA DACWAHA ANSHAX-MARINTA GARSOORKA**

1. Guddoomiyeyyaasha, Garsooreyaasha iyo shaqqalaha Maxkamaduhu waa in ay taageeraan oo gacan siiyaan geeddi socodka baadhista dacwadaha anshax-marinta garsoorka.

2. Guddoomiyeyaasha Maxkamaduhu waa in, haddii baadhista dacwad anshaxmarin garsoor darteed loogu baahdo, ay fududeeyaan oo xaqiijiyaan in la helo gal-dacwadeedyada iyo dhammaan dhokumentiyada khuseeya dacwadaas.

**QODOBKA 36AAD: BAAHINTA XEERNIDAAMIYAHA**

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Guddiga Caddaaladda ayaa ay waajib ku tahay in ay Xeernidaamiyahan baraan garsooreyaasha, xeer ilaaliyeyaasha iyo shaqaaleha Maxkamadaha iyo xafiisyada xeer ilaalinta, oo ay sidoo kalena baahiyaan si ay dadweynuhu u ogaadaan jiritaankisa..

**QODOBKA 37AAD: WAX KA BADELKA**

Guddiga Caddaaladdu waxay awooddaa in ay wax ka badal iyo kaabiskusmaeyso Xeernidaamiyahan.

**QODOBKA 38AAD: REEBANNAAN**

Xeernidaamiye, xeer hoosaad ama go'aan kasta oo ka soo horjeeda xeernidaamiyahani waa waxba kama jiraan.

**QODOBKA 39AAD: DAHQAN GALKA XEERNIDAAMIYAHAN**

Xeernidaamiyahani waxa uu dhaqan galayaa soddon (30) casho kadaib maalinta uu ansaxiyo Guudiga Caddaaladu.

Magacyada Guddiga Cadaaladda ee ansixiyay Xeer Nidaamiyaha Anshaxa iyi Anshax marinta Garsooryaasha iyo Ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud JSL:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Yuusuf Ismaaciil Cali | Gudoomiye |
| 2. | Xasan Axmed Aadan | Xubin |
| 3. | Yaasiin Xasan Ismaaciil | “ |
| 4. | Maxamed Muuse X. Cabdi | “ |
| 5. | Maxamed Cumer Geelle | “ |
| 6. | Aadan Jaamac Maxamed | “ |
| 7. | Abdi Faarax Geedi | “ |
| 8. | Xuseen Aw Nuux | “ |

Taariikhda la ansixiyay Xeerka
**04/08/2012**

Yuusuf Ismaaciil Cali
**GUDDOOMIYAHA GUDDIGA CADAALADDA**

Sahra Ismaaciil C/llaahi
**XOGHAYNTA GUDDIGA CADAALADA**